# Warbixin Dhameystirka Koleejka Wadajir Foundation 2024

## Hordhac

Guddiga loo xilsaaray dhameystirka Koleejka Wadajir waxay halkaan ku soo gudbinayaan warbixin ku saabsan wixii u qabsoomay muddadii shaqada dhameystirka lagu guda jirey.  Waxyaabaha ugu waaweyn ee qabsoomay waxaa ka mid ah dhismaha labo hool oo ardadu ku cunteeyaan, dhameystirka dhismahii qabyada ahaa, hagaajinta dhismihii hore, sharciyeynta dhulka, magacaabista guddi hoosaadyo iyo shirar loo qabtay bulshada reer Wadajir ee Wardheer.

Waxaan sidoo kale halkaan ku soo gudbineynaa maaliyaddii iyo sida loo isticmaalay iyo baahiyaha taagan ee u baahan in laga shaqeeyo si loo dhammeystiro howlaha muhiimka ah ee Koleejka. Waxaa guddiga dhameystirka si rasmi ah ugu wakiisheen hawshan muhiimka ah oo fuliyey Guddoomiyaha Golaha Fulinta ee Wadajir, Mahad Maxamad Cabdille (Mahad Afweyne).

## 1. Dhismahii qabyada ahaa iyo hagaajinta dhismihii hore:

Iyadoo la ogaa in horey dhismayaashii dambe ay qabyo ahaayeen, waxaa haddana u dheeraa dayac badan oo ka dhashay isticmaal la'aanta. Si kastaba ha ahaatee, waxaan ku guuleysannay inaan qabanno dhowr shaqo oo muhiim ah, kuwaas oo hoos ku faahfaahsan:

**Dhismaha iyo Dayactirka**:

- Waxaan dhammaan guryaha ku xirnay safiitooyin cusub.
- Laba hool oo cusub oo cunto lagu cuno ayaan dhisnay, midkiiba cabirkiisu yahay 14.5. mitir dhererka iyo 8.5 mitir balaca.
- Waxaa la qoday godka boosaneerka (bulaacada) oo lagu xiray tuubooyinka biyaha qaada iyo suuliyasha.
- Koleejka waxaa loo sameeyey tuubooyinkii iyo fiilooyinkii korontada qaadi lahaa.
- Dhammaan dhismayaashii dambe iyo labada hool ee cusub waa la riinjiyeeyay, taasoo kor u qaadday bilicda dhismaha.
- Waxaa la nadiifiyey dhammaan guryihii dambe.
- Waxaa sidoo kale la dayac tirey guryihii hore, masaajidka, xaafiisyada musqulaha iyo fasallada.

**Hagaajinta Dhulka, Wadooyinka iyo Baakinka Gawaarida**:

- Dhulka iskuulka waxaa lagu sameeyay hagaajin ballaaran, waxaana la dhisay **Toddobo (7) waddo**, oo kala ah:
- **Lix waddo oo cusub** oo isku xira dhismayaasha kala duwan sida fasallada, masaajidka, xafiisyada, qolka waardiyaha, labada qeybood ee guryaha jiifka, hoolasha, iyo jikada.
- Sidoo kale wadadii hore ayaa la ballaariyay, dhererkeedana waa la kordhiyay, waxaana lageeyey ilaa kurshiinka.

- Waxaa sidoo kale la sameeyay baakino loogu talagalay gawaarida booqanaysa koleejka, taas oo wax weyn ka tari doonta habsami u socodka gaadiidka.
- Dhulka oo dhan waxaa lagu wareejiyey cagaf si loogu muujiyo dhulka koleejku leeyahay maadaama aan silig la wada galin karin.

## 2. Sharciyeynta Dhulka:

Waxaa si sharci ah loo sharciyeeyay dhulka ay Wadajir leedahay, oo ay ku jiraan qeybta dhisan iyo qeybta bannaanba. Sidoo kale, waxaa dhulka loo sameeyay **Sabralooga**, waxaana xogtaas lagu xareeyay keydka xogta (Database-GPS). Sabraloogada asalka ah (original ka) waxaa haya Mudane Mahad Maxamad Cabdille (Mahad Afweyne).

## 3. Magacaabista Guddi Hoosaadyo:

Guddoomiye Mahad, ayaa soo dhisay guddi ka kooban **11 xubnood** oo ah ilaaliyayaal mas'uul ka ah Kuleejka, kuwaas oo ka mid ah qeybaha kala duwan ee bulshada. Magacyadooda waa sida soo socota:

1. Ganacsade Shiil Taabile
2. Nabadoon Maxamad Ismaaciil Xaashi
3. Nabadoon Axmednuur Yuusuf Boobe
4. Shiikh Cabdillaahi Cabdi Faarax Diirshe
5. Marwo Xalwo Tahaliil Xasan
6. Marwo Hani Ismaaciil Xaaji Cali
7. Guddoomiye Xaashi Nuur Gaas
8. Ganacsade Cabdiqani Xasan Yanyiir
9. Ganacsade Cawil Afcade
10. Mahdi Cali Guray Aw Xasan
11. Macallin Ciid

Xubnahani waxay kaalin muhiim ah ka qaadanayaan ilaalinta iyo horumarinta howlaha Kuleejka.

## 4. Shirarkii Reer Wadajir ee Wardheer

Kadib markii la dhameystiray dhismaha Koleejka Wadajir, waxaa shir ballaaran ka dhacay hoolasha shirarka ee Koleejka. Shirkaas waxaa ka soo qeybgalay bulshada reer Wadajir ee ku sugan waddanka, cuqaashooda, siyaasiyiin, ganacsato, iyo culumo. Waxay halkaas uga mahadceliyeen jaaliyadaha reer Wadajir ee qurba joogta ah iyo dhammaan dadkii ka qayb qaatay dhismaha Koleejka. Intii shirka socday, waxay codsadeen in Koleejka si degdeg ah loo qalabeeyo, iyagoo sidoo kale ay ballan qaadeen inay Koleejka u qodi doonaan ceel biyood, hawsha abaabulkeedana ay si rasmi ah u bilaabayaan.

## 5. Xisaabinta maaliyadda iyo sida loo isticmaalay:

Lacagtii miisaaniyadda waxay aheyd $**44,816.00**, laakiin waxaa laga jaray $**847**, oo ah khidmaddii lacagtii Mareykanka laga soo diray. Sidaas darteed, akoonka waxaa ku soo dhacday $**43,969**, waxaa sidoo kale soo gashay $510 oo ah deeq xubnaha ka timid iyo lacagta reer Wadajir ee mudug ka timid oo ah $2690. Cadadka guud ee lacagta accounka ku soo dhacday waa $47,169. Kharashka guud ee dhismaha ku baxay waa 26,967.50, sidoo kale waxaa akoonka ka baxday lacag $500 oo loo ansixiyey websiteka iyo astaanta iyo $100 oo ah waardiye bishaan. Guud ahaan lacagta akoonka ka baxday waa $27567.50.maantay oo taariikhdu tahay 12/ 01/ 2025, **Lacagta Bangiga Wadajir ku jirtaa waa $19,601.50.**

## Warbixin Dhameystirka Koleejka Wadajir Foundation 2024

Guud ahaan lacagta ku baxday dhameystirka Koleejka waa **$26,967.50**. Maalintii kharashkii ugu dambeeyey ee aan bixiney wuxuu ahaa **31/12/2024**, waxaana lacagtaas ahayd **$1,500**, taasoo ahayd lacagtii Eng. Abdiweli Maxamad Cali baaqiga u ahayd.

| **Faahfaahin** | **Cadadka Lacagta** |
|---|---|
| Lacagta lagu gaday qalabka dhismaha Koleejka | 3,160 |
| Labada hool ee carruurtu ku cunteeyaan | 7,500 |
| Lacagta gaariga qaaday alaabta dhismaha ee laga qaaday Gaalkacyo | 418.5 |
| Xamaalkii Gaalkacayo ka raray | 53 |
| Xamaalkii rogay ee Wardheer | 35 |
| Lacagta gacanta(maana-doobaro) ee Eng.Abdiweli Mohamed Ali | 3200 |
| Deyntii Eng.Abdiweli Mohamed Ali | 1700 |
| Godka boosaneerka iyo tuubooyinkii isku xiraayey godka iyo Suuliyaash | 3500 |
| Kharashka biyaha | 125.00 |
| Tuubooyinka Fiilooyinka Korontada qaada | 250 |
| Geeda jaris, wadooyinka gudaha iskuulka iyo baakinada | 800 |
| Hawl fullin iyo lacagta garaaniga | 1000 |
| Kharashka nadiifinta iyo dhaqista dhismaha guryihii dambe | 230 |
| Kharashka jibiska guryaha lagu riinyeyey iyo gacantii | 2100 |
| Kharashka diiwaan galinta dhulka Wadajir | 1,620.00 |
| Naash-naashka dhismihii hore | 445 |
| Mushaaraadka Waardiyayaasha | **300** |
| Kharashka cagaf cagafta dhulka lagu wareejiyey | 433 |
| Kirada gaariga iyo Xamaalka Jibiska raris iyo dajin | 98 |
| | **26,967.50** |

### 6. Gunaanad iyo Baahida Taagan:

Guddiga Dhameystirka Koleejka Wadajir waxay si guul leh u dhammeystireen dhismihii qabyada ahaa, iyadoo la dayactiray guryaha cusub, la sameeyay wadooyin cusub, la sharciyeeyey dhulka Wadajir, la hagaajiyey dhismihii hore, lana magacaabay guddi hoosaadyo ka masuul ah koleejka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa weli taagan baahiyo dhowr ah, sida in ganjeel lagaliyo irada hore ee koleejka, qalabeynta koleejka, sagxadaha guryahii hore, iyo in si joogto ah loo nadiifiyo si looga fogaado dayacaad dambe. Waxaa sidoo kale loo baahan yahay in godka ka hor qodan guryaha cusub la aaso. Intaas kadib, waxaan aaminsanahay in iskuulka la furi karo oo arday lagu soo xareyn karo. Waxaan rajeynaynaa in maamulka cusub ay si degdeg ah uga shaqeyn doonaan dhammaan howlahaas si loo furo Koleejka una noqdo mid waxtar weyn u leh bulshada reer Wadajir.

**Magacyada guddiga dhameystirka Koleejka Wadajir 2024**

1. Mahad maxamad Cabdille (Mahad Afweyne)
2. Iimaan Axmadnuur Warsame Juldhe
3. Cabdulqaadir Ismaciil Cali-seed
4. Siciid Maxamad Cali
5. Cabdinuur Faarax maxamuud.

**Dhammaad**

**Allaa Mahadleh**
**Guddiga Dhameystirka Koleejka Wadajir 2024**